



Hubinta Dakhliga

Hubinta saxda ah ee dakhligu waa mid aad muhiim u ah si loo hubiyo xaq u yeelashada iyo xisaabinta heerka gunnada. Waa kuwan waxa aad u baahan tahay inaad ka ogato qaybta hubinta dakhligaa ee codsigaaga dib u ansixinta.

Warbixinta Dakhliga

Codsadayaasha waxaa laga doonayaa inay soo sheegaan dakhligooda guud ee labo qof oo qaanga ah oo reerka ka mid ah kuwaas oo noqon kara waalid, xaaska waalidka, ama qofka daryeelaah ilmaha loogu talagalay inuu helo gunnada.

Si loo hubiyo in nidaamka dib u ansixinta uu si habسامي leh u socdo, fadlan hubi in dhammaan dukumentiyada aad qorsheyneyso inaad soo gudbiso ay buuxinayaan shuruudaha soo socda: Macluumaad Dhameystiran: Dhammaan dukumentiyada waa inay dhameystiran yihiin oo ay ku jiraan magaca codsadaha ama qofka labaad ee reerka. Taariikhaha Dukumentiyada: Dukumentiyada waa inay si cad u muujiyaa taarikhaha ay khuseeyaan. Shuruudahan waxay naga caawinayaan inaan si sax ah u hubinno dakhligaga oo aan si hufan u socodsiinno dib u ansixintaada.

Dukumentiyada loo baahan yahay

Codsadayaashu waxay awoodi doonaan inay aqoonsadaan ilaha dakhliga reerka oo ay soo geliyaan dukumentiyada loo baahan yahay mid kasta oo kamid ah ilaha dakhliga. Dhammaan ilaha dakhliga waa in lagu muujiyaa oo la dukumeentiyaa.

Isha Dakhliga	Dukumentiyada loo baahan yahay
Dakhligii shaqada - W-2 / 1099	<ul style="list-style-type: none">• Labadii bilood ee ugu dambeeyay jeegaga mushaarka dhammaan shaqoyinka• AMA, bayaan mushaarka oo loogu talagalay labadii bilood ee ugu dambeeyay ee dakhlii haddii codsaduhu yahay darawal ama qof wax gaarsinta u sameeya shirkad ku saleysan barnaami.• AMA, warqad shaq oo cusub oo taariikhaysan 60 maalmood gudahood ee codsiga. Warqadda waa inay ku jiraan taarikhda bilawga, saacadaha la shaqeeyay, iyo mushaarka.
Dakhligii iskii-u-shaqeysiga, dakhliga faa'iidata raasumaalka, dakhliga dividendka (kaydadka), dakhliga danta, dakhliga xuquuqda daabacaadda	<ul style="list-style-type: none">• Codsaduhu wuxuu u baahan doonaan inuu dhammaystiro caddeynata dakhliga iskii-u-shaqeysiga oo ay ku jiri karaan:<ul style="list-style-type: none">• Foomka• Cashuuraха 1040• Jadwalka 1• Foomka 1065• Jadwalka K-1• Jadwalka C (ama EZ)• Foomka 1120 (ama S)• Warbixinta Faa'iidata iyo Khasaraha ee saddexdii bilood ee ugu dambeeyay• Jeegaga mushaarka ee saddexdii bilood ee ugu dambeeyay
Caymiska naafada- SSI/SSDI	<ul style="list-style-type: none">• Warqadda abaalmarinta hadda
Kaalmada maaliyadeed ee ardayda	<ul style="list-style-type: none">• Warqadda abaalmarinta maaliyadeed• Shaqo waxbarasho- Warqadda abaalmarinta ama warqadda kormeeraha oo ay ku jiraan saacadaha/mushaarka
TANF ama kaalmada kale ee lacageed (sida caymiska shaqo la'aanta)	<ul style="list-style-type: none">• Warqadda abaalmarinta hadda
Dakhliga kirada	<ul style="list-style-type: none">• Dukumentiyada cashuurtu Jadwalka E ee sanadkii us-dambeeyay
Daryeelka carruurta (lacag la helay)	<ul style="list-style-type: none">• Rasiidhada lacago la helay
Shaqooyin lacag caddaan ah	<ul style="list-style-type: none">• Bayanka Codsga Dib u ansixinta
Dakhli kale	<ul style="list-style-type: none">• Bayanka Codsga Dib u ansixinta

Hubi inaad soo ururiso dukumentiyadaada oo aad diyaarisoo inaad soo gudbiso iyada oo loo marayo boggaaga si loo hubiyo in nidaamka dib u ansixinta ee gunnada daryeekaa carruurta ee Best Starts for Kids uu si habسامي leh u socdo!



**Ma U Baahan
Tahay Gargaar?**

Qoysaka waxaa lagu dhiirrigelinayaan inay la xiriraaan Kooxda Helitaanka iyo Taageerada Qoyska (FAS) si ay u helaan taageero inta lagu jiro habka dib-u-ansixinta oo dhan.

support@bskchildcare.org
(206) 208 - 6865



BrightSpark Early Learning Services | www.BrightSpark.org

Our mission is to nurture and sustain child-centered, antiracist early learning communities.